# Warqada Macluumaadka

## Rabshadda Qoyska: Waxa Booliisku Sameeyo

Somali / Soomaali

VICTORIA POLICE

### Ka-xoroobidda rabshadda waa xaqa aadanaha

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu xor ka noqdo rabshadda ama cabsida rabshadda. Qof kasta waxuu doonayaa inuu dareemo ammaan iyo ixtiraam qoyskiisa iyo xiriirada kalaba. Rabshadda qoyska way dhacdaa waxaana loo arkaa midaan laga ogolaan karin dhammaan bulshooyinka iyo dhaqamada. Australia, Xadgudubka qoyska waa sharci daro. Booliiska Victoria waxuu halkan u joogaa si ay u caawiyaan dadka u baahan iyo inay ilaaliyaan sharciga

### Waa maxay rabshadda qoyska, maxuuse sharcigu ka qabaa?

Sharciga u dagsan Victoria oo ah The Victorian *Family Violence Protection Act 2008* wuxuu qeexayaa in rabshadda qoyska tahay dhaqanka xubin ka tirsan qoyska oo ku abuuri karta cabsi iyo awood sheegasho Xaaskiisa, Xaas hore ama xubnaha kale ee qoyska ka midka ah. Dhaqannadaas waxaa ka mid noqon kara:

- Jirdilka (sida garaacid, riixidda, gubidda, naxdinta, xoqida ama daryeelid l'aanta);
- Xadgudubka galmada (sida in lagu qasbay in ay sameeyaan falal galmo);
- dhibaato dhaqaale (sida ka joojinta lacagta, cuntada, daawada, burburinta hantida, ama xadgudubyada yaradka la xiriira);
- ku-xadgudub nafsiga ah iyo / ama afka ah (sida hanjabaad, bahdilid taxane ah oo soo noqnoqota, magaca yeedhista, xaqiraad jinsi, midab, naceeb, xooga ama ku-xadgudub nacaybka);
- Ku sababida ilmaha iney maqlaan ama arkaan rabshadaha qoyska (tusaale ahaan maqalka dagaalada, dhaawac ama waxyeello).

Rabshadaha Qoyska uma fiicna caruurta, sharciga u degansan (dagsan) wadanka ayaa ilaalinaya xaquuqda caruurta.

### Waa maxay qoysku?

Sharciga ayaa qeexaya qoyska guud ahaan in ay ka mid yahiin:

- Iskaashiga Qoyska (nin ama naag, will ama gabar, wada-hawlgalayaasha isku jinsi ah) iyo
- Xaaskaada hore,
- carruurta, walaalaha, carruurtaada waaweyn, ama
- ehelka ama qaaraabo, soddog ama soddoh, aayada, adeer, xubin qoyska ku darsantay ama darsantay ama dhaqan ahaan ah
- Qofka ku caawinaaya wuxuu soo hoos galayaa qeyb ka mid ah sharci rabashada qoyska.

Haddii aad u aragto in qof ka mid ah qoyska inuu ku sameenayo falal cabsi galin ah iyo xad gudub, waxaad waydiisataa in lagu caawiyo.

Haddii aad dhib ugeysaneyso xaaskaada ama qoyska waxaad waydiisataa in lagu caawiyo. Waxaa ku yaala dhabarka dambe hay'addaha caawimaadka.

### Sidee booliisku wax u caawin karaa?

Booliiska Victoria waxay ka shaqeynayaan si ay u ilaaliyaan dadka waxyeeladu ka soo gaarto rabshada qoyska iyo in laga hortago qofka dhibka u gaysanaayo xaaska iyo qoyska.

Booliiska waxay ka heli karaan warbixinada rabshadda qoyska qof kale oo aqoon u leh rabshada qoyska, sida saaxiibada ka walaacsan, qoyska, dariska ama adeegyada. Booliisku ayaa sidoo kale laga yaabaa ay ogaadaan rabshada qoyska marka ay qabanayaan takaaliif kale ama ay sababo wacidda sadedxdan lambar 000.

Marka Booliisku yimaado si ay u caawiyaan xaalada qoyska rabshada ka taagan, waxay waydiiyaan yaa ku nool ama joogay guriga. Waxay hubinayaan in qof kasta nabad qabo. Booliiska ayagaa qof walba iskood ula hadla. Waxaa laga yaabaa inay caruuta waaraystaan. Waxay wax ka waydiiyaan waxa hada dhacayay iyo waxii horeba.

Waxay Booliisku hubiyaan in cidi u baahan tahay daryeel caafimaad rabshada dhacday darteed, waxay kaloo Booliisku qoraan waxyeelo kasta oo dhacday. Booliisku waxay u gudbiyaan warbixinta qofka gaarka ah meeshii ku haboon.

Booliisku waxaa kaloo laga yaabaa inay waydiiyaan in qof naafo ah uu jiro, xaalad caafimaad qabto ama baahi kale jirto, tasoo ay doonayaan inay shaaciyan lugna ku leh amaanka iyo jawaab-celinta booliiska.

Booliisku waxaa waajib ku ah inay waydiiyaan hadii qof ama caruurta uu yahay Aborjiinka. Dadka Aborjiinka ah ayaa sheegan kara haday ka jecel yahiin adeega caadiga kan aborjiinka.

Booliiska waxay samayn doonaan qiimeynta khatarta, ayagoo eegaya rabshadaha qoyska ee la soo dhaafay iyo taariikhda dambiyada la kaydiyay. Waxay aqoonsan doonaan qofkii waxyeelada ugu badan gaadhay (dhibanaha mase ama qofka qoyska ka tirsan) iyo kuu yahay qofka koowaad ee inta kale waxyeelaynaya (gardaraalaha koowaad mase kan dhanka kale). Ayadoo hadba ku xiran xaaladaha kala duwan, waxaa jira falal badan oo Booliisku qaadi karo.

Interpreter

[Adeegyada Turjumaanka](https://www.tisnational.gov.au)
24 saac ah
**131 450**
https://www.tisnational.gov.au

NATIONAL RELAY SERVICE

**Adeegga Relayga** (24 saac ah)
Ee loogu talagalay dadka dhagaha la' ama qaba dhantaalanka maqalka ama hadalka www.relayservice.gov.au
La-hadal oo dhagayso **1300 555 727**

000 EMERGENCY

Markii wax degdeg ah jiraan wac **Saddexdan lambar (000)**

**Amaanka ayaa mudnaanta koowaad leh.** Hadii dambi la galo Booliisku waa baarayaan waxaana dhici karta inay ku oogaan dambi. Si kastaba ha ahaatee, Noocyada rabshadaha qoyska oo dhan maahan fal dambiyeed. Talaabooyinka Rayidkaa (aan fal dambiyeed ahayn) oo Booliisku qaadi karo waa:

- inuu goobta saaro **ogaysiinta amaanka rabshada qoyska** la xiriira ama/iyo
- maxkamadda ka dalbado **amar soodhexgalka rabshadaha qoyska** ah ama
- badalo **amarka soo-dhexgalka** ee rabshada qoyska oo jiray si loo siyaadiyo amaanka.

## Waa maxy amarka soo-dhexgalka rabshadda qoyska?

**Amarka soo-dhexgalka rabshada qoyska** waa amar sharci ah oo ay soo saartay maxkamad loogana gol leeyahay in dadka laga ilaaliyo inay soo gaadho rabshad qoys oo dheeraad ah.

**Amarka ogeysiiska ammaanka rabshada qoyska** waa **amar soodhexgalid** muddo gaaban ah oo uu soo saaray Booliisku looggana gol leeyahay inay ilaaliyaan dadka ilaa maxkamada.

Waxay labada isticmaalaan ereyo farsamo ah. Qofka la ilaaliyo, oo ay ku jiraan ilma kasta, waxaa loo yaqaan **'qof la ilaaliyo'**. Qofka adeegsaday rabshada waxaa lagu magacaabaa **'ka-jawaabaha'** ama **'dhinaca kale'**.

**Amarka soo-dhexgalka** ama **ogaysiinta ammaanka** waxaa ka mid noqon kara **xaalada ka-reebidda**, kaas oo u abuura qofka amaanka u baahan ama caruurta aag amaan ah. Waxay ka mamnuucdaa qofka fala rabshadaha qoyska inuu yimaado agtooda ama meel ay tagaan. Taas macnaheedu waxuu noqon karaa in qofka sameeya rabshadaha qoyska inuu ku noolaado meel kale.

**Xaalada ka-reebidda** waxay soconaysaa ilaa go'aan maxkamadeed ama **amarka soodhexgelidda rabshadaha qoyska** la gaarsiiyo ka-jawaabaha.

Maalinta maxkamadda, garsooruhu waxuu tixgaliyaa tallaabooyinka loo baahan yahay si ay u siiyo ilaalinta joogto ah. Garsooruhu wuxuu go'aan ka gaari doonaa haddii **xaalad ka-reebidda** loo baahan yahay in la sii wado.

**Ogeysiinta ammaanka** ama **amarka soo-dhexgalka** (qoyska) oo keliya ma abuuri karo diiwaan dambi.

## Maxaa dhacaya hadii shuruudaha la jabiyo?

**Ka-jawaabaha** waa qofka ay tahy in uu adeeco ogeysiinta ama amarka. Haddii **ka-jawaabaha** uu si buuxda u adeeco amarka, uusana galin dambiyo kale, ma lahaan doonaan diiwaan dambi.

**Ka-jawaabaha** waa inuusan galin nooc kasta oo rabshad qoys.

Tani macnaheedu waa:

- inaysan jirin wax jirdil ah ama galmo qasab ah
- inaysan jirin hanjabaad ah inuu qof dhibaato u geysto qof kale,
- inaysan jirin Cay afka ah ama qoraal ah,
- inuusan dirin fariimo xadgudub ama hanjabaad ah,
- inuusan samayn dabagal,
- inuusan jirin xadgudub dhaqaale,
- inuusan gaysan waxyeello hantiyeed.

**Xaalada ka-reebidda** waxay macnaheedu tahay, in **ka-jawaabuhu**:

- Qofka inuusan tegin meel u dhow dadka la-ilaaliyey, ama halka ay ku nool yihiin ama ku shaqeeyaan ama u aadaan dugsiga ama child care-ka.
- inuusan dad kale u adeegsan inay dhaawacaan, u hanjabaan, kadeedaan, dabagalaan ama ku-xadgudbaan sinaba dadka la-ilaaliyey.

Waxaa kaloo jiri kara shuruudo xadidaya ku-wada-hadalka taleefanka, farriinta qoraalka, emailka ama warbaahinta bulshada.

Fulin-la'aanta wixii shuruud ah waxaa loo yaqaan **jebin** ama **ka-horimaad ogaysiinta ammaanka** ama **amarka soo-dhexgalka ah**.

Rabashadaha qoyska, **qofka ka-jawaabaha** waa inuu tixgaliyaa sharuudaha maxkadamada kasoo baxay, waana in uusan jabin amarka. Maxkamada kaliya ayaa badali karto wixii sharci ah. Hadaba booliiska waxay kugu qaadayaan sharci ah eedayn dambiyeed, diiwaan gelin dambiyeed iyo ciqaabo kale ah ganaax ama xabsi.

**Qofka la-ilaaliyey** ma siin karo **ka-jaawaabaha** ogolaansho inuu jebiyo ogaysiinta ama amarka. Booliiska keliya ayaa go'aansan kara eedaynta inay dhacdo, ee maahan **qofka la-ilaaliyey.**

Haddii aadan fahmin amarka, ama qayb kasta oo ka mid ah, weydii booliiska ama adeegga sharciyeed.

Fadlan u sheeg booliiska wixii baahiyahaaga wada-hadalka ah. Haddii ay ku dhibayso ku-hadlidda ama fahmidda Ingiriisiga booliiska ayaa kuu raadinaya turjumaan. Haddii aad u baahan tahay turjumaan jinsigaaga ah ama mid ku hadla lahjadaada u sheeg booliiska.

## Markii wax degdeg ah jiraan wac Saddexdan lambar (000)

## Maxay tahay sababta aad u tagayso maxkamadda?

**Ogeysiiska ammaanka rabshada qoyska** ama **Amarka soo-dhexgalka rabshada qoyska** waxay yeelan doonaa taariikhda maxkamadda. Waa inaad halkaas tagtaa. Waxaa xikmad ah in la qorshaysto in maxkamadda la joogo maalinta oo dhan.

Maxkamadda ka hor, waxaa fikrad fiican ah in la waco adeegyada taageerada si si buuxda laaga wada-hadlo xaaladdaada iyo baahiyahaaga. Turjumaanao yimaada ayaa lagu balamin karaa maalinta maxkamadda, haddii aad booliiska ama maxkamadda u sheegto baahiyahaaga wada-hadalka.

Maalinta maxkamadda, waa masuuliyadda **ka-jawaabaha** inuu ka dheeraado **dadka la-ilaaliyey**. Badanaa waxaa jira meelo ay tahay inay fariistaan. Maxkamadda waxaa jooga saraakiisha nabadgelyada si ay dadka uga caawiyaan inay ammaan dareemaan.

Inta maxkamadda la joogo waxaa jiraya adeegyada sharciyeed iyo adeegyada taageerada oo lacag la'aan ah kuwaas oo kuu sharxi kara xuquuqdaada, khayaaradaada iyo habraaca maxkamadda.

Markaad timaado, usheeg shaqaalaha maxkamadda ee qaabilaadda inaad joogto iyo haddii aad doonayso caawimaadda looyarka iyo adeegyada kale.

Waydii haddii maxkamaddu leedahay **Sarkaalka Xiriiriyaha Maxkamadda ee Rabshadda Qoyska ee Booliiska**, kuwaas oo xiriiriya dhammaan qaybaha, markii Booliiska Victoria ay codsadaan **amarka soo dhex-galka rabshada qoyska**.

Dhagayso magacaaga in loo waco dhagaysiga. Qolka dhagaysiga maxkamadda, fariiso gadaalka wakiilkaaga sharciyeed. Qaaliga ayaa dhagaysan doona labada wakiil sharciyeed wuxuuna si toos ah kuu weydiin karaa wixii dhacay.

Qaaliga ayaa go'aan ka gaari kara haddii **amarka soo dhex-galka rabshada qoyska** loo baahdo si loo siiyo ilaalin loona mamnuuco dhaqanka rabshadda ah. Qaaligu wuxuu tixgelin doonaa wixii shuruudo ahaa, sida shardiga ka-reebista ee loo baahan yahay iyo inta uu qaadanayo oo **amarka soo-dhexgalka ku dhammaanayo**. Go'aanka qaaliga wuxuu baddeli doonaa **ogaysiinta ammaanka** ama wuxuu baddeli doonaa **amarka soo dhexgalka** ee hadda jira.

Kadib dhagaysigaaga, ka sug maxkamadda wixii koobi ee **amarka soo-dhexgalka** cusub ah, weydii shaqaalaha maxkamadda wixii su'aalo ah oo aad qabto oo ku saabsan **amarka soo dhaxgalka** cusub ee adiga iyo qoyskaaga ah.

## Miyaad qabtaa wax su'aalo dheeraa ah?

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan amarkaaga, weydii saldhigga booliiska degaanka ama adeegga sharciyeed.
Booliiska ayaa kuu diri doona adeegyada taageerada, kuwaas qoraal ama ku soo wici doona, ama adiga ayaa adeegga waci kara.

**Markii wax degdeg ah jiraan wac Saddexdan lambar (000)**

## Macluumaad taageero & caawimaad dheeraad ah

**Maxkamadda Magistrates-ka (Magistrates' Courts)** Maxkamadda Dowlad-goboleedka taas oo dhagaysata arimaha rabshadda qoyska ah www.magistratescourt.vic.gov.au

**Caawimaadda sharciyeed ee Victoria (Victoria Legal Aid) 1300 792 387** (Isn –Jum 8.45am-5.15pm) Talooyin sharciyeed lacag la'aan ah oo lagu qabto luqado kala duwan www.legalaid.vic.gov.au

**Adeegga Sharciyeed Haweenka Victoria (Women's Legal Service Victoria) 8622 0600** (magaalada) **1800 133 302** (miyiga) (Talaado & Khamiis 5.30 - 7.30pm) www.womenslegal.org.au

**Khadka Taleefanka ee Dhibaneyaasha Danbiga Jariimada ah (Victims of Crime Helpline)** 8am-11pm (7 maalmood) **1800 819 817** www.victimsofcrime.vic.gov.au

**1800 Respect** (24 saac) La-talinta taleefanka ah oo loo sameeyey dhibaneyaasha rabshadda qoyska **1800 737 732** www.1800respect.org.au

**Khadka Shiddada ee Xadgudubka Galmada (Sexual Assault Crisis Line (SACL)) 1800 806 292** deegyo taageero (24 saac ah) oo la siiyo dhibaneyaasha xadgudubka galmada www.sacl.com.au

**Gurisiinta (Housing)** (24 saac) Meel-u-dirid Dowlad-goboleedka oo dhan ah ee gurisiinta degdegga ah **1800 825 955** www.housing.vic.gov.au/crisis-and-emergency-contacts

**Adeegga Shiddada ee Salvation Army (Salvation Army Crisis Service)** (24 saac) Gurisiinta degdegga ah ee ee magaalo weynta **1800 627 727** www.salvationarmy.org.au/en/Find-Us/Victoria/CrisisServices

**Safe Steps** Xarunta Ka-jaawbidda Rabshada Qoyska (24 saac) **1800 015 188** adeegga taageerada & meel-u-diridda ee haweenka www.safesteps.org.au

**Adeegga Meel-u-diridda ee Ragga (Men's Referral Service)** (9am – 9pm Isniinta - Jumcaha) taageerada & meel-u-diridda ee ragga **1300 766 491** www.ntvmrs.org.au

**MensLine Australia** (24 saac) **1300 789 978** taageero taleefan ee ragga www.mensline.org.au

VICTORIA POLICE

## Erayga & Qeexidda

**Tallaabo shibil ah (Rabshadda Qoyska)**
Tallaabo sharciyeed si loo ilaaliyo xuquuqda, fal aan-jariimad ahayn (tus. Codsiga **amarka soo-dhexgalka**).

**Rabshadda Qoyska**
Dhaqanka uu sameeyo xubinta qoyska taas oo u gaysata waxyeello, cabsi ama kontaroolidda xaaskaada ama xaaskaadii hore, carruurta, ama xubnaha qoyska ee kale.

Waxaana ka mid ah xadgudubka jidheed, xadgudubka galmeed, iyo ku-xadgudbidda caadifadeed, caqliyeed ama mid dhaqaaleed.

**Ka-soo-jawaabaha ama qayb kale**
Qofka kaas oo sharci ahaan ku jira ogaysiinta, ama lagu amray, si uu u joojiyo rabshadda qoyska.

**Qofka la-ilaalinayo / Dhibanaha / Xubinta qoyska ee wax-la-yeelay (AFM)**
Qofka, kaas oo rabshadda qoyska ay ka ilaalinayso **amarka soo-dhexgelka ah** ama **ogaysiinta ammaanka ah**.

Carruurta waxay noqon karaan dad la ilaalinayo.

Carruurta kuwaas oo ka yar 18 sano waxaa lagu dari karaa **ogaysiinta** b ama **amarka soo-dhexgalka ah** ee qofka la-ilaaliyey.

**Ogaysiinta Ammaanka ee Rabshadda Qoyska, (FVSN)**
Ogaysiinta sharciyeed oo uu bixiyo booliisku si loo mamnuuco rabshadda qoyska ilaa inta laga gaarayo dhagaysiga maxkamadda.

**Amarka Soo-dhexgalka Rabshadda Qoyska (FVIO)**
Amar ama qoraal tilmaaman oo ay samaysey maxkamad si loo mamnuuco rabshadda qoyska.

**Shardiga ka-reebidda**
Shardi ku yaal **ogaysiinta amaanka** ama **amarka soo-dhexgalka ah** kaas oo ka mamnuucaya **ka-jawaabaha** inuu yimaado agta **qofka la ilaaliyey**, ama goobaha uu amarku liisgareeyey (tus. guriga, shaqada, dugsiga ama child care-ka).

**La-gaarsiiyey**
Markii **amarka soo-dhexgalka ah** ama **ogaysiinta amaanka** si sharciyan ah loo gaarsiiyo **ka-jawaabaha**, waa 'la-gaarsiiyey' waana in la yeelaa.

**Diidmada ama jebinta**
Haddii qofka **ka-jawaabaha** ah uu diido shardiga ku saabsan **ogaysiinta ammaanka rabshadda qoyska** ama **amarka soodhexgalka ah** taasi waa 'diidmada' ama 'jebinta'.

Diidmada waa in loo soo-sheegaa booliiska sida ugu dhaqsaha badan oo suurtagalkaa waxayna keenaysaa ku-soo-oogid dambiyeed ah.

**Qabashada**
Qabashada qofka ay booliisku si macquul ah u rumaysan yihiin inuu jebiyey sharciga.

**Eedaynta dambiga ah**
Markii baarista booliiska ay hayso caddayn ku filan, ama macluumaad, in qofku jebiyey sharciga, eedayn ayaa lagu soo oogaa si uu qofku u yimaado maxkamadda.

## Kaalimaha booliiska

**Family Violence Liaison Officer (FVLO) Sarkaalka Xiriiriyaha Rabshadda Qoyska (FVLO)**
Sarkaalka booliiska kaas oo la socda arimaha rabshadda qoyska goobta booliiska, oo ku taal 24 saac saldhig ah.

**Rabshadda Qoyska, Sarkaalka Xiriiriyaha Maxkamadda (FVCLO)**
Sarkaalka booliiska oo jooga maxkamadda majiistareyka kaas oo xiriiriya qaybaha oo dhan ee codsiyada **amarka soo-dhexgalka ee rabshadda qoyska** oo uu booliisku soo-gudbiyo.

**Soo-sheegaha**
Sarkaalka booliiska kaas oo eedaynta kusoo ooga.

**Baaraha**
Sarkaalka booliiska kaas oo baaraya warbixinta Rabshadda Qoyska.

**Sarkaalka Heeganka ah (OIC)**
Sarkaalka heeganka ah, ama kormeeraha, ee saldhigga booliiska.

Waxaa jira saraakiisha xiriiriyaha ee booliiska kuwaas oo u go'doomay inay taageeraan kala-duwanaanta bulshada dhexdeeda ah weydii saldhigga degaankaaga ama ka eeg www.police.vic.gov.au

Haddii aad qabto wax dareeno ah oo ku saabsan sida booliisku wax u qabtay, weydii inaad la hadasho kormeeraha ama sarkaalka heeganka ah ee jooga saldhigaaga booliiska ama ka eeg 'ammaanaha iyo cabashooyinka' oo ah www.police.vic.gov.au

**Markii wax degdeg ah jiraan wac Saddexdan lambar (000)**